Warbixinta Talaalka cudurka Korona

Cudurka korona
Cudurka Korona (SARS-COVID-2) Waxaa kala qaadikara Biliaadmiga dhexdiisa waxa uu sababi karaa
Cudurka loo yaqaano COVID-19. Caabuqani waxaa uu khuseeya Dadka oo idil, Hayaraado ama ha waynaado.

Cudurkani haduu kugudhoco waxa uu ku hayn karaya Maalmo ama Todobaadyo Waxaad isku arki karaysaa Xumad ,Qufac, Urka Iyo Dhadhanka oo kaataga ,Neefta oo ku qabata.

Hadii uu Cudurku Kugu sii kordho waxaa dhicikarta in uu Neef mareenada Iyo Xubnaha kale Infakshin ku keeno. Qofkaas Xaalada Culusi ku timimaado , in Isbitaalka Laseexiyo oo xaaladiisa lagula Tacaalo ayuu u baahan yahay. Cudurka Karoona waxaa uu ku dabasocon kara wakhti aad u dheer waana loo dhiman karaa. Sidaa darteed waxaa lagama maarmaan ah Qofku in uu istalaalo kaliya ayuu kaga hortagi karaa.

Waa maxay sababta aad isu Talaalayso?
Talaalku Waxa uu Kaabadbaadinayaa Cudurka COVID-19.

Taalaalku muxuu kutari?
Talaalku jirkaaga ayuu adkaysi uyeeli ,waxuuna ka hortagi Wax kasta oo Cudur culus ah ,marka uu Cudurka COVID-19 (SARS-CoV-2) Kugu soo Boxo , Talaalku waxaa u wax ku tarayaa ugu yaraan 6 Bilood Gudohood. Waxaa mar mar dhacda in adigoo Talaalan in uu kugu dhoco Cudurka COVID-19 Lakiin.

Nasiib wanaag si yaroo khafiifa in uu ku saameeyo ood ka bad baado dhimasho.
Talaalku wax maado ah oo Caabuq keeni karta kuma jirto ama keeni karta (SARS-CoV-2). Sababtaa darteed Talaalkani isagaaba ka hortagaya COVID-19 in uu kugu dhoco.

Talaalkan Miyaala Hubaa in uu wax tarayo?
Haa, aad ayaa loo cilmi baadhay loona Hubiyay wax tarkiisa.Talaalka Qarada Yurub Soogadhay COVOD-19 aad ayaa loo baadhay waxa uu ka kooban yahay ee gudihiisa ku jira , Xafiiska Yurub ee Qaabilsan Dawooyinka (EMA) ayaa soo fasaxay Talaankan .

Yaa La Talaali Karayaa?
Waxaa Talaalkan Qaadan karaya Laga bilaabo 16 Jir ama 18 Jir iyo Wixii kawayn.

Iyo waliba Dadka Cudurada Joogtada ah Qaba sida (Macaanka ,Dhiigkarka ,Wadna Xanuunka ,iyo Neefta) Talaalkan way qaadan karaan. Lakin inta aan La Talaalin waxay la tashan karaan dhakhtarkooda kadib ayay Go,aansan karaan in ay istalaalan haday Doonayaan .

Waxaa kaloo istalaali karaya dadkaasaCuduka Xasiyada Qaba(Cuntada qaar,Cudbiga Geedaha,Boodhka,iyo Dawooyinka qaar sida Antibiyootiga).Laakiin waa in ay dhakhtar kooda kala soo tashadaan oo loo soo sharaxo waxa uu yeeli karo Talaalkani waa in ay horay u soo qaataan karka Xasaasiyada.

Yaan Talaalkan Loo ogolayn ?
Hadii xaaladaada cafimaad aad u liidato sida hadii Xumad aad ah ay ku hayso, oo Herkulka jirkaagu 38 Digrii uu dhaafo, Waa in aad La tashi dhakhtar kaga lasamaysaa.

Hadii aad Uur Leedahay ama aad Qorshaynayso Uur Kala tasho Dhakhtar kaaga.

Ama Hadii aad COVID-19 uu wakhtigan xaaliga uu ku hayo 4tii Todobaad aad ku dhex jirtid.

Ma in La Talaala Dadkii Horay Cudurkan COVID -19 u soo Qaaday?
Kadib markii aad Cudurka COVID-19 Horay u kugu dhacay hadana markale waad qaadi kartaa,Sababtaa Darteed waa in La Talaalo Dadkaa Horay Cudurka COVID-19 uu u haleelay.

Talaalka waa in 6bilood Cudurka Kadib Lagu Talaalaa.

Halkee ama Sidee La ii Talaalaya?
Talaalkan waxaa laga bixinaya Meelo kala Duwan , Wakhtiga Ku Haboon Ayaan ku soo sheegi Doona .

Goorta Iyo Meesha aad iska Talaalayso.

Sidee Ayuu u Dhaqan Galayaa Talaalku?

Si xorr ah ayaad isu Talaali kartaa ,Hadii aadan doonayn Cidi kugu qasbi mayso, Talaalku Waa Bilaash.

Wax lacag ah Laguu soo racan maayo.

Talaalka Ka hor waraaq ayaa lagu siin Doona aad su,aalo iyo Jawaab iyo mid Labux buxinayo.

Waxii aad Fahmi waydo ula Tag Dhakhtar kaga khaaska ah.

Horay u soo Qaado E-card iyo Karka Talaalka, Hadii aad haysato.

Waxaa lagaa talaalaya Cududa ama Garabka ,Talaalka kadib waxaad sugi 20 Daqiiqo goobta lagugu Talaalo, Hadii aad si xun dareentid waa in aad dhakhtarka meesha jooga ogaysiisid.

Noocyo badan oo Talaal ah ayaa jira, Nooc kasta 2 jeer agaan ayaad u qaadan kartaa , Nooca 1aad markaad qadatid dhawr todobaad kadib ayaad qadan kartaa kann 2aad.

Nooca Talaalka ma dooran karaa?
Maya. Nooca markaa Yaala unbaa lagu mudi ,magaran karno nooca uu yahay.

Talaal kani wax dhibaato ah maleeyahay?
Marka Lagu Talaalo Kadib Waxaa lagayaaba in aad Si aan Fiicnayn Dareentid,Xumad, in meeshi Lagaa muday Kusoo Bararto ama ku Casaato. Waxaa badaa dhacda Qofka marka Latalaalo in uu Daal isku arko ama Madax Xanuun Iyo Xumad yar oo Khafiif ah.

Dareenkaasi waa wax iska Caadiya Qofku in uu dareemo Talaalka kadib ,Waayo Jirka ayaa ka Hortagaya waxan Cusub ee soogalay. Badanaa Dhawr maalmood Kadib Caadi ayaad ku soo noqon.

10 Qofba 1 ayaa Dareema waxa aan Kor kusoo Xusnay.

Talaalka Kadib Ma in aan Afxidhka looyaqaano FFP2 Xidhaa?
Haa waa in aad Xidhataa Afxidhka waliba adoo Talaalan. Waa in aad ilaalisid Kala Fooganshaha Nadaafada , Sanka iyo Afxidhka FFP2.

https://www.sozialministerium.at/Corona-Schutzimpfung/Corona-Schutzimpfung---Haeufig-gestellte-Fragen.html

https://www.sozialministerium.at/Informationen-zum-Coronavirus/Coronavirus---Aktuelle-Informationen-in-Fremdsprachen-.html

https://www.sozialministerium.at/Corona-Schutzimpfung/Corona-Schutzimpfung---Jetzt-anmelden-/Faktencheck-zur-Corona-Schutzimpfung.html